

Iminka waxaa la gaaray waqtigi iskool la codsan lahaa xilli dugsiyeedka deyrta 2024

This information is available in English, Somali and Arabic. Go to www.norrkoping.se/skolval to read the information in these languages.

Adigaaga leh canug **fasalka dugsiga xannaannada billaabi doona xilli dugsiyeedka deyrta ee 2024** waa in aad iskool canuggaaga u codsataa. Waxaad iskool ka codsan kartaa fasal dugsi xannaano oo degmo iyo mid gaar loo leeyahay labadaba, waana muhiim in aad adigu ka waalid ahaan dugsi doorasho sameysid.

Codsigaaga iskoolka waxaad soo gudbineysaa inta u dhexeysa 10 Jannaayo iyo 24 Jannaayo

Waxaad codsigaaga ku aaddan iskoolka ku soo gudbineysaa adeegga elekteroonigga ah ee iskool doorashada. Isku xiraha adeegga elekteroonigga ah wuxuu ku jirya www.norrkoping.se/skolval. Inta u dhexeysaa 10 Jannaayo ilaa iyo 24 Jannaayo 2024 ayaad adeegga elekteroonigga ah ku geleysaa oo aad ku soo gudbineysaa rabitaankaaga ku aaddan iskoolka. Waxaad sameyneysaa doorasho ku aaddan ugu yaraan seddex iskool, laakin waxaad codsan kartaa inta iskool ee aad doontid. Codso, sida aad u kala jeceshiidna u kala hor-hormar iskoollada aad is leedahay waa in uu canuggaagu dhigto. Marka aad ku gashid adeegga elekteroonigga ah waxaad codsiga ku saxiixeysaa adeeg elekteroonig ah, tusaale ahaan Bank-ID-ga taleefanka gacanta. Labada waalid waa in ay isla saxiixaan si uu codsigu u shaqeeyo.

Haddii aad rabtid in aad iskool xor ah boos ka codsatid

Adigaaga daneynaya dugsi gaar loo leeyahay waxaad u baahantahay in aad dugsigaas toos u codsatid, codsigaaga **na** xitaa ku gudbisid adeegga elekteroonigga ah ee iskool-doorashada. Waa muhiim in aad labadaas tallaab qaaddid si aad boos u heshid. La xiriir dugsiga ay arrintu khuseyso si aad u ogaato sharciyada ay u leeyihiin meelaynta.

Xeerarka ku aaddan cidda boos heleysa

Haddii aad codsatay iskool degmadu leedahay waxaan ka duuleynaa codsigaaga intii suurta gal ah. Haddii aan boos loo hayn dhammaan kuwa codsaday waxaa la adeegsanayaa xeerka u soo kala horreynta si go'aan looga gaaro cidda booska heleysa. Masaafada u dhexeysa cinwaanka uu canuggu ku qoranyahay ilaa iyo iskoolka uu dalbaday micno weyn ayey u leedahay fursadda ku aaddan in uu canuggu boos helo. Wixii dheeraad ah ka akhriso www.norrkoping.se/skolval.

Haddii aadan sameyn doorasho iskool wuxuu canuggaagu boos ka helayaa mid ka mid ah iskoollada boosku ka bannaanyahay ee masaafo macquul ah guriga u jira.

Jawaab ku aaddan iskool ku meeleyntu waxay imaanaysaa bartamaha Maarso 2024

Maarso gudeheeda ayaad heleysaa jawaab ku aaddan iskoolka uu canuggaagu booska ka helay. Jawaabta waxaa lagu dhex faafinayaa adeegga elekteroonigga ah ee loogu tala galay iskool doorashada, waxayna, marka ay kuu taallo jawaab ay tahay in aad akhrisatid, fariini kuugu imaanaysaa taleefanka gacanta ama e-mailka. Gal adeegga elekteroonigga ah si aad u heshid jawaabta.

Gaadiid iskool

Gaadiidka iskoolku waxa uu aadaa dugsiyada qaarkood, waxa loogu yeero iskoollada gaadiidka lagu geeyo. Haddii aanu jirin dugsi masaafo macquul ah u jira guriga, waxay ilmuhu heli karaan gaadiid u qaada iskoolkooda gaadiidka lagu tago. Waxaad adeegga elekteroonigga ah ka arki kartaa hadduu canuggaagu leeyayahay iskool leesu qaado iyo iskoolka uu kaasi yahay. Haddii aad rabto inaad hubiso inaad hesho iskool u qaadis, waa inaad codsataa iskool la isu qaado. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaadiidka dugsiga waxaad ka heleysaa norrkoping.se

Ma qabtaa su'aalo ama ma u baahantahay caawimaad?

Booqo www.norrkoping.se/skolval si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, waxna uga heshid su'aalaha iyo jawaabaha. Halkan waxaa tusaale ahaan ku jira macluumaad ku aaddan iskoollada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee Norrköping ka jira iyo xeerarka kala horhorreynta ee loogu tala galay iskool doorashada fasalka dugsiga xannaannada ee iskoollada degmada.

Waxaad sidoo kale Xarunta xiriirka degmada kala xiriiri kartaa taleefan nambarka 011-15 00 00. Waxaa sidoo kale Xarunta xiriirka lagu booqan karaa Trädgårdsgatan 21 i Norrköping.

Waad ku mahadsantahay in aad soo gudbisay codsigaaga ku aadan iskoolka!

Salaan diiran

Xafiiska waxbarashada, degmada Norrköping